IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 1 Abriil 1980 L. 4

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOOWAAD

**SHARCI**

W. M.

### QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 49 BIS ee 27 Jennaayo 1980, Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho. Bogga 420

### QEYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

SOCITA' COMMERCIALE ITALO SOMALA S.C.I.S S.P.A. OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI L. 132 » 460

SOCIET COMM5RCIALE ITALO SOMALA S.C.I.S S.P.A. AVVISO DI CONVOCAZION DI ASSEMBLE ORDINARIA L. 132 » 461

SOCIET' ROMANA IN SOMALIA S.P.A, OGEYSIIS, ISU YEERID SHIR CAADI AH L. 133 » 462

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA S.P.A, AVVISO DI COIVOCAZIONF DI ASSEMBLE ORDINARIA L. 133 » 463

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA S.A.I.S, S.P.A. OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH 134 » 464

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA S.A.I.S SPA AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA L. 134 » 465

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30. 3. 1980 Lumid Buug Kayd L. 2822 L.134 » 466

MAXKAMADDA GOBOLKA BANNADIR, 20. 3. 1980 Lumid Buug Kayd Lamb. 14418 L. 134/Bis » 467

## QAYBTA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 49/bis ee 27 Jenaayo 1980

## MADAXWEYNAHA

## J. D. S.

MARKUU ARKAY: Qodobbada 82, 93, 94, 111 iyo 113 Dastuurka J. D. S.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. yahay 2 ee 23. 12. 1972 iyo Xeerka L. yahay 14 ee 23. 12. 1972 Nidaamka iyo Xeerka lagu dhaqo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: XEERKA L. yahay 28/BIS ee 21. 2. 1976 oo ku saabsan Shaqaalaha Dawladda Hoose ee Muqdisho.

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la sameeyo xeer lagu dhaqo Ciidaanka Ilaalinta Degaanka ee Dawladda Hoose ee Muqdisho,

ISAGOO TIXGELIYAY Taladii uu soo jeediyay Duqa Magaalada Muqdisho.

**Wuxuu soo saarayaa Xeerka soo socda**

### QODOBKA 1AAD

### QORIINTA IYO KA TIRSANAANTA

1) Ciidanaka Ilaainta Degaanka ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, waa ciidan ka mid ah, qaybna ka ah Maamulka Dawladda Hoose, waxayna ku dhisanyihiin nidaam askarnimo oo ka soo jeeda xilkooda u gaarka ah, iyagoo yeelanaya lebis iyo astaamo lagu aqoonsado.

2) Ciidaanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose, waxaa maamul ahaan madax ka ah Duqa Magaalada Muqdisho; xag-

ga xilgudashada waxay hoos imaanayaan Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose oo awood u leh inuu amarro iyo talooyin siiyo; soona saaro xeer nidaaminaaya xilka iyo shaqada u gaarka ah, isagoo raacaya awaamiirta lana tashanaaya Duqa Magaaladda Muqdisho.

3) **Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose markay Xilkooda gudanayaan waxay saldhig ka dhiganayaan mabda'a Dimuqraadiyada iyo Hantiwadaagga**

## QODOBKA 2AAD

## TALIYAHA IYO TALIYE KU-XIGEENKA

1) CiidankaIlaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, waxay leeyihiin Taliye oo laga soo xulay saraakiisha sare ee howsha si joogto ah uga soo shaqeeyay, waxaana lagu magacaabayaa xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS, isagoo dhegeystay talo soo jeedinta Duqa Magaalada.

2) Ciidaanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, waxay leeyihiin Taliye Ku-Xigeen, laga soo xulay saraakiisha Ciidanaka Ilaalinta Degaanka, oo howsha si joogta ahaan u haayay, waxaana lagu magacaabayaa xeer uu soo saaro Madaxweynaha J. D. S. isagoo dhegeystay talo soo jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

## QODOBKA 3AAD

## XILKA CIIDANKA ILAALINTA DEGAANKA

Guud ahaan xilka Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose waa ilaalinta iyo ka hortagga gefefka lidka ku ah, Nidaamka iyo amarrada ka soo baxa Dawladda Hoose, waxayna qayb wax ku ool ah, ka qaadanayaan ilaalinta iyo hirgelinta shuruucda Dalka, gaar ahaanna sharciyada sida gaarka ah u saameynaaya xilkooda.

## QODOBKA 4AAD

## HABKA DHISMAHA CIIDANKA ILAALINTA DEGAANKA DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

Dhismaha Ciidaanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, wuxuu ka koobmaa laba xubnood oo asaasi ah :

b) Xubinta Taliska Guud
t ) Xubinta Nidaamka Hawlaha.

## QODOBKA 5AAD

## XUBINTA NIDAAMKA HOWLAHA CIIDANKA ILAALINTA DEGAANKA

Xubinta Nidaamka Hawlaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho iyagoo leh Talis oo isku wada mid ah, haddana shaqo ahaan, waxay u qabsamaan, 5 (shan) qaybood oo mid kastaba ay leedahay xil iyo waajibaad u gaar ah.

Qaybaha ay ka kooban tahay xubinta Nidaamka Hawlaha Ciidanka Ilaalinta Degaan. Dawladda Hoose, waxay kala yihiin:

1) Qaybta Magaalada

2) Qaybta Caafimaadka

3) Qaybta Duunyada

4) Aadaabta

5) Suuqyada

## QODOBKA 6AAD

## XILKA QAYBAHA XUBINTA NIDAAMKA HAWLAHA EE CIIDANKA ILAALINTA DEGEENKA DAWLADDA HOOSE.

Xilka iyo waajibaadka gaar ahaaneed ee Qaybaha Ciidanka Muqdisho waa sida hoos ku qoran :

*b)* QAYBT*A* MAGAALADA

1) Ilaalinta waqtiyada u go'an xiritaanka rugag ganacsiyeedka;
2) Miisaannada iyo qalab kasta ee wax lagu beego, ama ilaalinta mid kasta ee wax lagu cabbiro ee shaabad la'aanta ah;
3) Ilaalinta, dhowridda saacadaha iyo maalmaha festooyinka ah ee la mamnuucay in wax la ganacsado;
4) Ilaalinta ascaarta badeecadda iyo qalabka ee nuuc kasta leh;
5) Ka hortagga ganacsiga ee shati la'aanta ah;
6) Joojinta dhismaha magaalada ee amar la'aanta ah;
7) Fulinta amarrada la xiriira dhismo joojinta iyo guryo dumiska;
8) Ka hortagga alaab dhigashada, iyo isticmaal waddada lugeedyada;
9) Ka reebidda dhagaxa, carrada, nuurada ku qubidda waddooyinka iyo meelaha kaloo la mamnuucay in si gooni ah wax loo dhigto;
10) Ka hortagga guryo dhiska naqshad iyo fasax la'aanta ah;
11) Xafidaadda dhulalka u keydsan danaha guud ahaaneed ee laga yaabo in loogu isticmaalo dano gaar ahaaneed;
12) Ilaalinta ciyaaraha nuuc kasta leh ee lagu sameeyo meelaha waddooyinka dhexdooda ah ama agagaarkooda ah oo ruqso loo haysan.
13) Joojinta ganacsiga nuuc kasta leh, ee lala meereysto ama shati la'aanta ah;
14) Ka hortagga ficillada derbiyo wax ku qoridda ah;
15) Kormeerka iyo ilaalinta u hoggaansanaanta shuruudaha uu sharcigu ku tilmaamayo habka iyo nidaamka haysashada Shatiyada.
16) Ilaalinta nidaamka boosteejooyinka iyo guud ahaanba nidaam dhowridda Gaadiidka dadweynaha.
17) Hawl kasta oo la xiriirta Magaalada Muqdisho oo uu amar ka soo saaro Duqa Magaalada Muqdisho.

T) QAYBTA CAAFIMAADKA :

1) Fulinta amarada la xiriira Nadaafadda guud iyo sixadhawridda magaalada Muqdisho.

2) Baaritaanka sixida hilibka, kalluunka iyo wixii la mid ah oo dhan;

3) Baaritaanka sixada caanaha iyo wax alaale wixii macmacaan ah;

4) La socodka buugaagta Caafimaadka;

5) Ka hortagga cunto ganacsiyeedka wax u dhimeysa sixada dadweynaha;

6) Wax ka qabashada sixada xun ee ka imaan karta musqulaha magaalada;

7) Reebitaanka qashin ku qubidda waddooyinka iyo meel kastoo laga mamnuucay ama ka reeban qashin ku shubidda;

8) Ka hortagga dhawaaqyada iyo shanqar kasta oo wax u dhimeysa nasashada dadweynaha iyo tan gaar ahaaneedba;

9) Wax ka qabashada warshadaha iyo farsamooyinka dabeecadaha shaqadoodu dhalineyso shanqar dadku ku argagixi karo;

10) Ka hortagga wasakhda iyo waxyaabaha bur burka ah, ee lagushubo meelaha aan ku habooneyn;

11) Wax ka qabashada sixa xumida ka dhalaneyso xoolaha lagu dhaqo magaalada gudaheeda;

12) Baabuur ku meyrashada fuuntaanooyinka, beeraha iyo meel kasta ee wax u dhimeysa quruxda Magaalada;

13) Hawl kasta oo la xiriirta Magaalada ama uu amar ku soo saaro Duqa Magaalada.

14) Sugidda ama dhowridda xeerka u degsan qabuurta iyo aasidda meydka.

### *J* — QAYBTA *D*UUNYADA

1) Fulinta amarrada la xiriira nidaamka guud ee kawaanka gowraca iyo qalliinka.

2) Baabi'inta hilibka sixadiisu shakisan tahay;

3) Nidaam dhowridda habka xoolo gowricidda;

4) Ilaalinta Nabadgelyada kawaanka gowraca;

5) Hawl kasta oo la xiriirta Magaalada ama uu amar ka soo saaro Duqa Magaalada

## X — QAYBTA AADAABTA

1) Sugitaanka aadaabta bulshada;
2) Ka hortagga waxyaabaha xun xun ee caada baabi'iska ah;
3) Ka hortagga si xun dhar u qaadashada khilaafsan hidda iyo dhaqanka Ummadda Soomaaliyeed;
4) Qabashada sakhraamiinta jidadka dhac-dhacaya;
5) Qabashada Carruurta ku barbaareycsa dawarsashada iyo derbiyo Seexadka.
6) Dumarka caadeystay inay jirkooda gataan;
7) Hawl kasta oo la xiriirta Magaalada ama uu Aamar ku soo saaro Duqa Magaalada.

## KH) QAYBTA SUUQYADA

1) Fulinta amarrada la xiriira Suuqyada Magaalada Muqdisho;
2) Soo hoynta cashuuradka Daw/Hoose ka soo gala cuntada iyo alaab kasta oo lagu ganacsado Suuqyada;
3) Ilaalinta soohdimaha dhulalka loo baneeyey Suuqyada M/Muqdisho;
4) Kormeeridda ascaarta la xiriirta qudaarta, hilbaha iyo cunta ganacsi ahaan loo soo dhigto Suuqyada;
5) Habaynta balabalooyin Suuqyada dhexdooda ah;
6) Ilaalinta Guud ahaaneed ee kala nidaaminta ganacsiga Suuqyada;
7) Hawl kasta oo la xiriirta Suuqyada Magaalada Muqdisho ama uu amar ku soo saaro Duqa Magaalada Muqdisho.

## QODOBKA 7AAD

## XILKA DHEERAADKA AH EE CIIDANKA ILAALINTA DEGAANKA MUQDISHO

1) Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho in kastoo ay u kala baxaan qaybo xilkooda iyo waajibaadkoodaba u gaar yihiin, hadana guud ahaan waa isaga mid xagga masuuliyadda la xiriirta shaqooyinka loogu daneynaayo bulshada ku dhaqan Magaala-madaxda Muqdisho;
2) Ciidanka Ilaalinta Degaanka xilkooda gaar ahaaneed ka sokow waxay leeyihiin xil dheeri ah, kaasoo ay ka gargaarayaan gudashada xil Sharciyeedka gaar ahaaneed ee Ciidammada Booliska JDS.
3) Haddii loo baahdo Ciidaanka Ilaalinta Degaanka waxay wax ka wadaagaan ama ay gacan ka geystaan fulinta xilka gaar ahaaneed ee Ciidammada Booliiska Dalka Soomaaliyeed, waxayna awoodi karaan qabashada qofkii ay kula kulmaan asagoo dembi gelayo, isla waqtigaasna Ciidanka Ilaalinta Degaanka waa inay si dib u dhac la'aan ah ugu wareejiyaan qofka la xiray ama la qabtay iyo qalabka dembiga lagu galay Ciidanka Booliiska.

## QODOBKA 8AAD

## NIDAAMKA GUUD EE CIIDANKA ILAALINTA DEGAANKA MUQDISHO

Nidaamka guud ee saameeya shuruudaha shaqada, habka dalacaadda, daryeelka habsamida ama anshaxa, abaal-marinta iyo daryeelka guud ahaaneed ee la xiriira Hawlgabka iyo Liilitirka, waxaa lagu nidaaminayaa Lifaaqa 1aad oo ah qayb ka ah Xeerkaan.

## QODOBKA 9AAD

## FAYLALKA ASKARTA CIIDANKA ILAALINTA DEGAANKA

Askari kasta oo ka tirsan CID/Muqdisho, wuxuu leeyahay gal u gaar ah oo lagu uruuriyo arrimaha la xiriira askariga inta

uu hawsha hayo, ha noqoto Dokomentooyinka saameeya qoritaankiisa, horumarkiisa, anshaxiisa iyo habka shaqada uu hayo.

## QODOBKA 10AAD

## HABKA DEREJOOYINKA

Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, waxay Leeyihiin derejooyin ku dhisan habka Ciidammakale, waxayna u kala sareeyaan sida soo socota :

**B) SARAAKIIL SARE**

G/Sare, G/Dhexe iyo Gaashaanle.

**T) SARAAKIIL HOOSE**

Dhamme, L/Xiddigle iyo Xiddigle.

**J) SARAAKIIL XIGEEN.**

**K/S. K/L. K/K. S/A iyo L. Alifle**

**X) ASKARI**

— Alifle, Askari iyo Dable dhiman.

## QODOBKA 11AAD

## KU DHAQAN XEER KALE

Duqa Magaalada Muqdisho, wuxuu awood u leeyahay inta la kari karo inuu raacaa waxyaabaha ku qoran Xeerka Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed gaar ahaan dhanka tababarrada, Labiska iyo astaamaha.

**QODOBKA 12AAD**

**XEER NIDAAMIYE**

Duqa Magaalada Muqdisho, wuxuu soo saari karaa Xeer ama go'aan oo lagu nidaaminaayo habka ugu wacan oo lagu Fulinaayo Xeerkaan.

**QODOBKA 13AAD**

**MUSHAARKA CIIDANKA IYO GUNNNOOYINKA**

Wixii ku saabsan Mushaarka Ciidanka Ilaalinta Degaanka iyo Gunnooyinka kala duwan waxaa laga fiirindoonaa Saxda «B» iyo «T» ee Xeerkaan ku Lifaaqan.

***HABKA* DHAART*A***

**QODOBKA 14AAD**

**FAL *DEMBIYEEDKA***

Fal dembiyeedka ay galaan Xubnaha ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawlada Hoose, waxaa awood u leh inay qaado Maxkabadda Ciidmmada Qalabka Sida.

**QODOBKA 15AAD**

**BAABI'IN**

Xeerkii 1958kii ee Dawladda Hoose ee Muqdisho iyo wixii toos-toosin ah oo uu lahaa iyo wax allaale wixii Dekreeto ah amase Xeer ah oo ka soo horjeeda ama aan waafaqsanayn waa la baabi'iyey.

**QODOBKA 16AAD**

**DHAQAN GELID**

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 1da bisha Jennaayo 1979ka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed.
Muqdisho 27 Oktoobar 1979

***MADAXWEYNAHA JDS***
***Jaalle* MAXAMED *SIYAAD* BARRE**

## LIFAAQA «B»

## XEERKA CIIDANKA ILAALINTA DEGAANKA MUQDISHO

### QODOBKA 1AAD

### DHAARTA QASABKA AH

1) Qof kasta Soomaali ah ee ka mid noqonaaya Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, waa inuu gutaa Dhaarta Sharciga ah.

2) Marka la dhaarinaayo Xubnaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka D. Hoose ee Muqdisho waa in qof qof loo dhaariyo.

### QODOBKA 2AAD

### HABKA DHAARTA

Dadka ka tirsan C. I. Degaanka Muqdisho waa inay ugu dhawaaqaan Dhaarta habka soo socda :

«Waxaan ku dhaaranayaa Magaca Ilaahay inaan daacad u noqdo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, XHKS. iyo Xukuumada uga Wakiilka ah, inaan u dhowro Sharciyada Dalka iyo go'aannada ay soo saarto Dawladda Hoose ee Muqdisho, Amarrada Duqa Magaalada iyo Madaxda iga sareysa amarka ay isiiyaan. Waxaan ku dhaaranayaa inaan Daafaco Mabaadi'da Saldhigga u ah Himilooyinka Kacaanka 21ka Oktoobar 1969, meel kastoo aan ku Suganahaba iyo inaan ku dhaqmo si Sharaf, geesinimo iyo anshax ay ku jiraan ha ahaato waqti Nabadgelyo ama mid dagaal, isla markaana aan Xaajinaayo sirta laygu aaminay oo dhan.»

## QODOBKA 3AAD

## KU KALA HORRAYNTA DARAJADA

1) Ku kala horraynta darajadu waxay ka bilaabataa taariikhda lagu magacaabo darajada uu wato qofka ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho.

2) Haddii ku kala horraynta darajada markaas la joogo lagu kala bixin waayo sida uu tilmaamayo Xubinta 1aad ee Qodobkaan waxaa dadkaas lagu kala saarayaa sidey darajadii hore ugu kala sarreeyeen ama Shaqada loo qoraaye.

## MADAXA 1AAD SHURUUDA SHAQADA

## QODOBKA 4AAD

## HABKA SHAQO QORIDDA CIIDANKA ILAALINTA DEGAANKA DAWLADA HOOSE

Markii la rabo in Askar loo qoro Ciidanka Ilaalinta Degaanka, waxaa lagu qorayaa Amar ka soo baxa Duqa Magaalada Muqdisho.

Haddii loo baahdo Saraakiil qoritaankooda waa in lagu hirgeliyaa tartan loo bandhigo Dadweynaha iyadoo la tilmaamaaya arrimaha soo socda :

b) Shuruudda layska doonaayo iyo nidaamka ka qaybgalka.

t) Habka xaqiijinta shuruudaha kor ku qoran.

j) Wixii kaloo faah faahin ah oo arrintaas la xiriirta.

## QODOBKA 5AAD

## XULASHADA KA QAYBGALAYAASHA

Xulushada ka qaybgalayaasha Imtixaanka L/Saraakiisha iyo Saraakiil Xigeenada waxaa sameeya Taliyaha Ciidanka iyo Guddi uu magaabo Duqa Magaalada.

## QODOBKA 6AAD
## GUULEYSIGA IMTIXAANKA

1) Kuwa rayidka ah ee ku guulaysta tartanka waxaa lagu qorayaa L/Sarkaal iyagoo isla markaa laga doonayo fulinta waajibaadka helayana Xuquuqda la xiriirta xilka cusub ee ku xusan Xeerkan D/Hoose ee Muqdisho, amarrada Duqa Magaalada iyo wax allaale wixii Sharci ah ee ay Leedahay Dawladda.

2) L/Sarkaal oo horay uga tirsanaan jirey Ciidanka Ilaalinta Degaanka ee ka gudbi waayey Imtixaanka ugu dambeeyey ee tababarka Saraakiilnimada wuxuu haysanayaa darajadii uu watay ka hor intaan loo qaadan Layli Sarkaal.

## QODOBKA 7AAD

## IMTIXAANKA KAMA DAMBAYSTA AH

Layli Sarkaalka ah ee gudbi waaya imtixaanka kama dambaysta ah sababtu wax kastaba ha noqotee, waa la ruqsayn karaa ama waxaa loo qaadan karaa Shaqada Ciidanka Ilaalinta Degaanka ee Muqdisho iyadoo darajada la siin doono ay ku xiraan tahay hadba aqoontiisu inta ay la'eg tahay.

## QODOBKA 8AAD

## QIIMAYNTA IYO MAGACAABIDDA SARKIISHA CIIDANKA

L/Sarkaalka ka gudba imtixaanka ugu dambeeya ee tababarka Sarkaalnimada waxaa lagu magacaabi karaa Sarkaal.

## QODOBKA 9AAD

## KU KALA HORRRAYNTA MAGACAABIDDA SARKAALNIMADA

Ayadoo ay jirto magacaabidda ku kala horraynta darajada caadiga ah, marka darajada Sarkaalnimada lagu qaadanaayo tartan, waxaa ku kala horraynta lagu tixgelinayaa sida loogu kala sarreeyo dhibcaha Imtixaanka.

## QODOBKA 10AAD

## SHAQADA JOOGTADA AH

Qaybaha shaqada joogtada ah ee qofka askariga ahi ku sugnaan karo waa sida soo socota :

b) Shaqada aan kala go'a lahayn.

t ) Sugitaan shaqo ama ku maqnaan fasax.

j ) Shaqa ka joojinta mudada ah.

## QODOBKA 11AAD

## SHAQADA AAN KALA GO'A LAHAYN

1) Askariga ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho ee shaqada u haya Ciidankaas shaqa kastoo looga diro waxaa lagu tirinayaa inuu haayo shaqo aan kala go' lahayn.

2) Askariga haaya shaqo aan kala go'a lahayn waa inuu ahaado mid Caafimaad qaba, una feejignaado shaqada loo xilsaaray.

3) U qalmidda shaqada askarinimada ee Qofka waxaa xaqiijinaaya Taliyaha Ciidaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho.

## QODOBKA 12AAD

## SHAQO SUGID

1) Qofka ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho oo si ku meel gaar ah kaga joogsada shaqada Caadiga ah, sababaha soo socda midkood waxaa loo tixgelinayaa shaqa sugid.

b) Jirro aan joogta ahayn oo ay shaqado keentay.

t ) Jirro aan joogta ahayn oo aan shaqado keenin.

j ) Dan shaqsi ah.

i) sharci ahaan haddii sababtu tahay midda xarafka «B».

ii) Warsi iyo ogolaasho ama amar madaxda ka yimid ha-
ay i siiyaan. Waxaan ku dhaaranayaa inaan Daafaco Mabaa-
dii Sababtu tahay midda Xarafka (T) iyagoo u baa-
han baarid Caafimaad.

iii) Cod kaliya marka sababtu tahay midda xarfka «J».

2) Inta aan la siin qofka Fasaxa shaqo sugidda ee Jirrada waa in la siiyaa Fasaxa caadiga ah ee uusan weli qaadin

3) Fasaxa shaqo sugiddu wuxuu ku eg yahay marka ay dhamaato sababtii dhalisay. Waqtiga fasaxa loo qaa-tay dan shaqsi ah ama jirro ay shaqado keenin kama uu badnaan karo dhamaantii 2ba (laba sano), Shan sano gudahood.

4) Waqtiga fasaxa jiirrada oo ay sababeysay jirrado ka-ma badnaan karo dhammaantiis (3) Saddex sano ilaa (5) Shan sano gudahood.

5) Marka uu u dhamaado fasaxa shaqa sugiddu askariga waa inuu bilaabaa shaqada.

6) Haddii fasaxa shaqa sugidda uu ka bato intii u go'nayd oo ahayd 2ba sano ama 3 — Saddex sano, 5 — Shan sano gudahood, hadba midda uu yahay askariga waa la ruqsayn karaa.

7) Haddii arrin deg deg ah ama u baahnaanshaha kale oo lagama maarmaan ah timaado, askariga ku jira fasa-xa shaqa sugidda waa la soo celin karaa.

8) Fasaxa shaqa sugidda waxaa bixin kar aDuqa Magaa-lada isagoo kala tashaaya Taliyaha Ciidanka Dawlad-da Hoose.
ah qofku xaq uma laha Mushaar.

9) Haddii fasaxa shaqa sugidda ay saameyso daan khaas ah dammada Qalabka sida ee Dawlada Shishiiye ah.

10) Haddii fasaxa shaqa sugiddu ku yimid jirro aan la xiriirin shaqada, askariga waxaa uu qaadan karaa mushaarkiisa oo dhan 6da bilood ee hore, 6da bilood ee ku xigtana nus mushaar, kadibna mushaarku dha-maan waa ka wada go'ayaa.

11) Haddii fasaxa shaqa sugidda ay keentay jirra la xiriirta shaqada, wuxuu xaq u leeyahay qofku mushaar dhan, muddo (1) hal sano ah sanadka ku xigana wixii ka dhiman Nu's mushaar, wixii ka dambeeyana intaas xaq uma yeelanaayo wax mushaar ah.

12) Ayadoo ay arrimaha kor ku xusan sidoodaba yihiin, askariga qabo jirro aan shaqada la xiriirin, marka la sameeyo xaqiijin Caafimaad kadib waa laga ruqsayn karaa shaqada waqti kasta, inta aan la gaarin muddada halka sano ah sida uu qabo Xarafka 10aad ee qodobkaan, marka ay sugnaato in nooca jirada uu qabo ay tahay mid u diideysa karti uu ku qabto shaqada askarinimada.

## QODOBKA 13AAD

## KA JOOJIN SHAQO

1) Shaqa ka joojintu waxay ku imaan kartaa arrimaha soo socda :-

b) sabab ah feejignaandarro,

t) sabab habsami darro ah;

j) sabab xukun Ciqaabeed ah;

x) u qalmi la'aanta shaqada caadiga ah;

2) Sababaha ku xusan xarafka (B) iyo (T) waxay ku imaan karaan in qofka askariga ah lagu helo dembiyo suura gelinaaya in laga qaado xukun ciqaabeed ama mid habsami ah, shaqa ka joojintu waa khasab marka askariga loo soo gooyo amarka xeridda ama qoraal ka soo baxay Duqa Maggaalada Muqdisho.

3) Marka dacwad ku qaadista ciqaabeed ay ku dhamaato inaan xukun caddeynaaya dembi jirin oo aan eedeysanuhu dembigaas gelin, shaqa ka joojintu way baabi'eysaa.

4) Sidaasoo kale shaqa ka joojintu way baaba'eysaa marka askariga aan lagu qaadin dacwad ku qaadistaas aysan ka soo bixin wax xukun ah, waxay ku eg tahay inta qofka xeritaankiisu socdo.

5) Marka shaqa ka joojintu ku timaado talaaba habsami ah, qofka waa in loo sheegaa dooda dacwadda loo haysto iyo dhaqaan galka ka joojinta.

6) Shaqa ka joojintu waxay ku xiran tahay ogolaashaha Taliyaha Ciidaanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, isagoo helay aqbalidda Duqa Magaalada ama Ku-xigihiisa.

7) Marka qofka Xaq la siinaayo mudada shaqada ka joojinta loo fiirin maayo haddii aan laga noqon shaqa ka joojintaas.

## QODOBKA 14AAD

## SAAMAYNTA XUKUNKA CIQAABEED EE TALAABOOYINKA HABSAMIDA

Xukunka Ciqaabeed ee dhigaya in askariga lagu waayey dembigii loo haystay amase inaan Dacwaddiisii la sii wadin, caddayn la'aan darteed, ma hor istaageysa Xukunkaasi qofkaas lagu qaado dacwo habsami ah.

## QODOBKA 15AAD

## JOOGSASHADA SHAQADA JOOGTADA AH

1) Shaqada joogtada ah waxay dhamaaneysaa qofka askariga ah markay yimaadaan Xaalaadka soo socda :

b) Da' ama shaqo ka fariisad.

t) Jirro.

j) U qalmid la'aanta darajada Xafiiska.

x) Codsasho Shaqa ka tegid.

Kh) Amar Shaqo ka saarid

2) Shaqa ka fariisinta Saraakiisha waxaa lagu soo saarayaa Xeerka Madaxweynaha markii uu dhagaysto talada Duqa Magaalada oo horay u tixgeliyey warbixinta Taliyaha Ciidanka.

3) Shaqa ka fariisinta xagga da'da waxaa caddeynaya Sharciga Lamb. yahay (6) lix ee soo baxay 31. 12. 69kii toosintii ka dambeeysay.

4) Askariga si joogta ah u noqdo mid aan ka bixi karin shaqada askarinimada amase aan caafimaadin kadib markuu dhamaystay waqtigii ugu badnaa ee shaqo nasashada sida ku xusan Qodobka 12aad ee Xeerkaan shaqada waa laga fariisin karaa. Waxaa tallaabadaas oo kale laga qaadi karaa askariga aan u qalmin xilka darajada loo dhiibey xag akhlaaqxumo ama aqoon la'aanta xirfadda darteed.

5) Haddii askarigu shaqeeyey ugu yaraan 10ban sanadood oo xiriir ah, shaqada wuu uga bixi karaa codsasho uu soo weydiistay isagoo Xaqiisii la siinayo, ogolaasha codsashadaas waxay ku xirin tahay baahida Shaqada looga qabo.

6) Shaqada waxaa qofka looga fariisin karaa ama loogaga saari karaa xaalaadka soo soeda :

b) haddii lagu soo caddeeyo inuusan u qalmin ama uusan hanan karin shaqo Dawladeed.

t) hadduu ku kaco fal aan ku habboonayn darajadiisa.

j) hadduu ku dhaco xukun Ciqaab ku saabsan dembi qofku kas u galay kana reebaaya Shaqada Dawladda.

X) Haddii uu shaqo ka qabto ayadoon cidi u fasixin, Ciidammada Qalabka sida ee Dawladda Shisheeye ah.

Kh) Hadduu jinsiyadda Soomaalida mid ka duwan qaato.

D) Askariga lagu ruqseeyey waxyaabaha kor ku xusan, looma ogolaan karo inuu dib ugu soo noqdo Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, xataa hadday baaba'do sababtii markii hore keentay shaqo ka saaridda ama shaqo ka Fariisinta

## QODOBKA 16AAD

## SHURUUDDA DALLACAADAHA

Si askarigu uu u noqdo mid istaahila dalacsiinta darajadiisa waa inuu ahaado jir ahaan mid u fiyow, lehna sifooyinka wanaagsan xagga akhlaaqda, dabeecadda, aqoonta kasmada iyo xirfdda looga baahan yahay darajada loo dallacsiinaayo.

## QODOBKA 17AAD

## NOOCYADA U QALANKA DALLACSIINTA

1) Dallacaaddu waxay ku imaaneysaa kala horraynta shaqo ku raagidda, amase Xulasho ay dhalisay mudnaan aan caadi ahayn.
2) Taliyaha Ciidanka wuxuu awood u leeyahay isagoo haysta ogolaashaha Duqa Magaalada inuu diyaariyo Liistada tirada Saraakiil Xigeenada, Alifleyda iyo Dableyda loogu tala galay dallacsiinta, taasoo ku xiran had iyo jeer tirada ka bannaan Jagooyinka kala duwan ee Ciidanka.

Qofku wuxuu dallacaad mutaysan karaa marka Caafimaad qab, hufnaan, karti, aqoon tacliimeed ama xirfad dheeraad ah iyo niyadsami Kacaanimo uu muujiyo.

## QODOBKA 18AAD

## DALLACSIINTA XAGGA SHAQO KU RAAGIDDA

1) Si uu u noqdo mid istaahila dalacsiinta ku imaaneysa shaqo ku raagidda waa in askariga marka hore loo aqoonsadaa inuu leeyahay shuruudaha ku xusan Qodobka 16aad ee Xeerkaan, waana inuu ku jiraa Liistada dadka shaqo ku raagidda leh, loona haayo jagadii loo dallacsiin lahaa.

2) Dallacsiinta askarta ka tirsan Qaybaha kala duwan ee Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose, waa in loo raacaa habka sidey shaqo ku raagidda darajooyinka ay joogaan ugu kala horreeyaan.

## QODOBKA 19AAD

## DALLACAAD AAN CAADI AHAYN

1) Dallacaadda shaqo ku' raagidda ka sokow, askarigii u qabta Ciidaanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, ama Qaranka hawl aan caadi ahayn amase muujiya istaahilid dheeraad ah ama la yimaada hanuunsanaan, kacaanimo, Duqa Magaalada wuxuu awoodi karaa inuu u sameeyo ama u tixgeliyo dallacaad mudnaansho ah.

2) Dallacaadda askari loo dalacsiinaayo Xiddigle iyo darajada ka sareysa, waxaa lagu' soo saarayaa Xeer uu soo saxiixo Madaxweynaha J. D. Soomaaliyeed, kadib markuu dhagaysto tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

3) Dallacaadda loo sameeyo darajooyinka A/le ilaa K/s; waxay ku soo baxayaan go'aan uu saxiixay Duqa Magaalada Muqdisho, kadib markuu dhagaysto tala jeedinta Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawlada Hoose ee Muqdisho.

## QODOBKA 20AAD

## LIISKA DARAJADA SHAQO KU RAAGIDDA

Liiska darajada shaqo ku raagidda iyo isku' xiridda xagga shaqo ku raagidda ee Qaybaha Ciidanka kala duwan loona jeedo tixgelinta dalacsiinta waxay ku cad yihiin ama ku xiran yihiin Liiska uu soo diyaariyo Taliyaha Ciidanka.

## QODOBKA 21AAD

## GUDDIGA DALLACAADDA

1) Si loogu dhaqaaqo dalacaadda ku saabsan shaqo ku' raagidda ama xu'lashada Duqa Magaalada Muqdisho, wuxuu u leeyahay inuu dhiso guddiga dallacaada Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho.

2) Guddiga dalacsiinta wuxuu ka koobnaan doonaa Xubnaha gu'ddiga maamulka iyo Taliyaha C.I.D. Dawlada Hoose ee Muqdisho.

3) Guddiga dalacsiinta, wuxuu awood u leeyahay inuu ra'yi ka dhiibto dallacaadda ku imaan karta shaqo ku raagidda ama xulasho Ciidanka Ilaalinta Degaan. ka Dawladda Hoose ee Muqdisho, si go'aankooduna sharci ahaan ugu ansaxana waxaa lagama maarmaan ah in fadhiga ay ka soo qaybgalaan (3) saddex meelood laba xubnaha guddiga ahna kuwa xaqa u leh inay codkooda dhiibtaan.

## QODOBKA 22AAD

## QIIMAYNTA DALLACSIINTA

1) Si askariga ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho loogu tixgeliyo dallacaad xag shaqo ku raa. gid waa inuu darajada uu ka dalacaayo haayey ugu yaraan 2ba sano.

2) Looma tixgelin karo dallacsiintaas askariga Ciidanka Ilaalinta Degaanka ka tirsan waqtiga qiimaynta lagu jiro ay u socoto dacwo ku qaadid Ciqaab ah ama mid habsami ah amase haddii Shaqada laga joojiyey.

3) Askarigu wuxuu mutaysanayaa dallacaad shaqo ku raagidda markii Xubnaha guddiga ee ka soo qaybga. lay qiimaynta askariga intooda badan isku raacaan in la dalacsiiyo.

4) Guddigu wuxuu go'aankiisa dalacsiinta ku saabsan qaadanayaa asagoo Saldhig uga dhigaayo waxyaaba. Saldhig uga dhigaayo waxyaabaha ku yaalo galka gaar ahaaneed ee qofka iyo gaar ahaan Xaashida qofka shaqsiyaddii. sa tilmaameysa ee waqti ka waqti askariga laga qoro iyo Natiijada Imtixaanka uu galo.

5) Xagga dallacsiinta xulashada ah waxaa loogu tirina. yaa mid uu u qalmo askariga tiro caddaan ah oon ka yarayn (3) Saddex meelood laba (2) dadka sowdka bi. xinaya. Askarta la caddeeyo inay dallacsiintaas u qal. maan waxaa la gelin karaa, taasoo uu awood u leeya. hay Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho, tababar qiimayn ah.

6) Guddigu wuxuu siin karaa qof kasta oo ka mid ah Askarta loo qaatay inay dalacsiinta u qalmaan dhibco lagu kala soocaayo isku xigidda xagga kala sarraynta ayagoo haddii laba qof sinaato xagga dhibcaha u kala horraynta hadba sidey shaqada ku raagiddeeda ugu kala horreeyeen.

7) Askarta hesha go'aan ah inaysan u qalmin dallacsiinta waxaa guddigu ku dhigayaa Diiwaan caddeynaya sidey isugu xigaan.

8) Dhibcaha xagga u qalmidda oo ku xusan Xubinta 6aad (Lixaad) waxaa guddigu go'aaminayaa asagoo tixgelinaayo Qodobada soo socda :

b) Hoggaaminta xagga akhlaaqda shaqsiyadda iyo dhismaha jirka intaba.

t ) Kartida xagga xirfadda ee uu qofka saayidsaday intu shaqada hayey, ayadoo gaar ahaan la tixgelinaayo awoodda hoggaaminta iyo kartida kale ee u gaarka ah qofka askariga ah.

j ) awoodda xagga aqoonta iyo waxgaradnimada.

9) Askarta lagu daray Liistooyinka u qalmidda dallacaadda iyo isku xigidda xagga istaahilka gaar ahaaneed ee uu u ogolaaday Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaan Muqdisho, waxaa dallacsiintaa siinaaya madaxda tooska u maamula. Kuwa ayagu hela go'aan ah u qalmid la'aan waxay ka qaybgeli karaan mar kale Imtixaano kaas ku xiga oo qiimayn ah.

10) Caddaynta u qalmidda dallacaadda iyo ku dhigidda liistada istaahilidda gaar ahaaneed waxay qofka xaq u siineysaa ama u siinayaan inuu helo dallacaad isla markiiba ah.

11) Dallacaadda qofka askariga ah ee laga helo shuruudaha ku' xusan Xubinta 2aad ee qodobkaan waa la joojinayaa. Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawlada Hoose ee Muqdisho, wuxuu awood u leeyahay inuu hakiyo dallacaadda askariga lagu tuhnsan yahay inuu gacanta kula jiro dembiyo halis ah amase ay ku socoto dacwad Ciqaab ama habsami ah, qofka arintu khuseyso warbixin ku saabsan joojintaas dhacday waa in laga soo qoro.

12) Askarta aan qiimaynta helin amase aan dallacaad la siin ayadoo ku' timid sababaha ku xusan Xubinta 2aad iyo tan 11aad ee Qodobkaan asaga ah, waxaa qiimaynta la siin karaa ama la dallacsiin karaa markii ay baaba'aan arrimihii markii hore qiimaynta ama dallacsiinta hor joogsaday

## MADAX IIAAD.

## MABAADII'DA GUUD EE FASAXA DARYEELIDDA DHAQAALE AHAANEED IYO XAALKA SHAQAALAHA

### QODOBKA 23AAD

### MUSHAARAADKA

1) Haddii aan Xeerkaan si kale u tilmaamin, askarta ka haysa shaqa joogta ah amase ku jirta fasax Caadi ah ama fasax jirro ah wuxuu Xaq u leeyahay dhammaan mushaarka iyo gunnooyinka darajadaas u' degsan.

2) Mushaarka iyo gunnooyinka waxay ka joogsanayaan askariga :-

b) Haddii shaqada joogtada ah uu ka soo baxo sababtu wax kastaba ha ahaatee.

t) Hadduu si Sharcidarro ah shaqada uga maqnaado mu'ddo ka badan 48 saac.

j) Haddii fasax lacag la'aan ah loo siiyo arrima isaga u gaa rah.

x) Haddii la caddeeyo inuu yahay qof shaqada ka baxsaday.

## QODOBKA 24AAD

### MUSHAAR DHIMID

1) Mushaar dhimidda ama wax ka go'inta qofka askariga ah oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka D. Hoose ee Muqdisho, waxay kaliya oo ay ku imaan kartaa siyaabaha soo socda :-

b) ganaax lagu qaado qofka asagoo ku xadgudbey habsamida awgeed.

t) haddii shaqada laga joojiyo.

j) haddii uu lunsado, wax gaarsiiyo ama khasaaro u keeno hanti ay Dawladdu leedahay.

x) haddii fasax aancaadi ahayn loo siiyo waxbarasho ama jirro sida uu qabo Xeerkaani;

2) Haddii laga reebo xaaladda shaqo joojinta oo mushaarka iyo gunooyinka aan laga yareen karayn bar, xaaladaha kale marna lagama badin karo dhimidda xadka ku shagan qodobka 45 (3) ee Xeerkaan asaga ah.

## QODOBKA 25AAD

### FASAXA JIRADDA

1) Muddada qofka ku jiro fasax jirro oo ka yimid shaqo uu gudanaayay ama aysan keenin shaqo, wuxuu leeyahay mushaahro buuxa;

2) Muddada uu qofku ku jiro fasaxa lacag la'aaneed ama muddo shaqo ka joojin uu ku jiro wax mushaar ah ma laha.

## QODOBKA 26AAD

## HABKA CADDEYNTA HDIBAATOOYINKA

Geeri, awood beelidda, jirrada iyo dhaawaca caddeynta inuu geeridu, awood beelidda, jirradu ama dhaawac qofka askariga ah ee Ciidanka Ilaailnta Degaanka Muqdisho ka tirsan, waxaa awood u' leh Taliyaha Ciidanka, isagoo dhegeystay ra'yiga guddiga takhaatiirta oo arrintaas sharci ahaan loo xilsaaray.

## QODOBKA 27AAD

## FASAXA CAADIGA AH

1) Iyadoo ku xiran habka baahida shaqadu siiday tahay, dadka ka tirsan Ciidaanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdishu, waxay xag u' leeyihiin fasax caadi ah oo dhan 30 (soddon) maalmood halkii sano oo shaqo ahba.

2) Dadka ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdishu waxaa waqti kasta Taliyaha Ciidanku ka soo celin karaa fasaxaas isaga ah haddii loo baahdo.

## QODOBKA 28AAD

## FASAXYADA

1) Iyadoo ku xiran baahida shaqada siday tahay, dadka ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka waxay qaadanaayaan fasaxyadooda caadiga ah sanad waliba;

2) Iyadoon wax loo dhimayn wixii fasax ah oo horay sharci ahaan ugu bislaaday, waxaa reeban in fasax la uruursho ama la diido qaadashadiisa sabab la'aan, haddii kale waa in loo tixgeliyaa.

## QODOBKA 29AAD

## DARYEELKA ASKARTA DIBEDDA WAX KU BARANEYSA

1) Xubnaha ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawlada Hoose ee Muqdisho ee waxbarasho awgeed dibedda loo diro, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka u degsan Ciidammada Qalabka Sida.

2) Waa inay iyadoo qoraal ah ballan qaadaan inaysan Shaqada Ciidanka ka tegeyn inta aysan dhamaan muddadii uu qorayey Sharciga Lamb. yahay 72 ee 18. 3. 1972kii. kuna saabsanaa Deeq waxbarashada Dibedda iyo Deeq tababarka.

3) Dadka ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho, oo ka soo bixi waaya ballanqaadkaas isaga ah waxa Khasab ku noqoneysa inay Dawladda u Celiyaan makhaasiirtii ku baxday tacliintooda dibedda.

## QODOBKA 30AAD

## DAAHIDDA KA SOO NOQOSHADA FASAXA

Askariga ka soo laabta fasaxa isagoo soo daahay wax cudurdaar ah oo caqliga geli karana aan keenin, waxaa lagu qaadayaa Nidaamka habsamida ama Xeerka ciqaabta Ciidammada Qalabka Sida.

## QODOBKA 31AAD

## CIDDA FASAXYADA BIXIN KARTA

1) Duqa Magaalada Muqdisho, wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo fasax nuuc kasta ha noqdee Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawlada Hoose ee Muqdisho sida uu qorayo Xeerkaani.

2) Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawlada Hoose ee Muqdisho, wuxuu siin karaa fasax nuuc kasta ha noqdee, askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta

## QODOBKA 32AAD

## WARQADAHA RUQSADAHA

Marka la ruqseynayo askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawlada Hoose ee Muqdisho, waxaa la siinayaa warqad caddeynaysa sababta ruqsadda iyo mudada uu shaqada hayey, marka la siinaayo warqadda askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka, waxaa laga doonayaa inuu soo celiyo Hubka uu hayo, Rasaasta iyo wax allaale wixii qalaba oo Dawladdu leedahay ee uu hayey ama amaankiisa ku jirtey.

## QODOBKA 33AAD

## WAAJIBAADKA LAGA DOONAAYO ASKARIGA FASAXA KU JIRA

Askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, kuna jira waqtiga fasaxa, wuxuu u hoggansamayaa waajibaadka habsamida iyo kuwa xaaladdiisa Sharci ahaaneed fareyso.

## QODOBKA 34AAD

## BUUG GELINTA FASAXYADA ASKARTA

Fasax kasta oo la bixiyo waa in la geliyaa galka askariga la siiyey.

## QODOBKA 35AAD

## HABSAMIDA

## MADAXA IIAAD

## GEFAFKA IYO CIQAABTA LA XIRIIRTA (XEER JEBINTA)

## MABDA'A GUUD

Haddii la jebiyo falalka kala duwan kuna tilmaamaan Qod. 44aad ee Xeerkaan, waxaa la raacayaa habka dacwo qoridda uu dhigaayo isla Xeerkaan.

### QODOBKA 36AAD

### NIDAAMKA LOO QAADAAYO DEMBIYADA ASLUUBEED

1) Si loo dhowro cadaaladda waajibaadgudashada asaasiga ah ee Ciidanka, dambiyada asluubeed ee Xubnaha Ciidanka, waxaa la hor dhigayaa gu'ddiga habsamida.
2) Marka askariga la ciqaabayo waa loo tixgelinayaa asluubtii hore, waxayna u tixgelinayaan waaya aragnimadiisa shaqada iyo waxa ku kalifay xadgudubkaas.
3) Qof kasta oo madax ah kuma qaadi karo qof ka daraja hooseeya, ciqaab ka gedisan midda ku xusan Xeerkaan ama ka sareysa awooddiisa.

### QOOBKA 37AAD

### KA HORTAGGA XADGUDUBKA HABSAMIDA

Askari kasta oo ka tirsan C. I.Degaanka ee arka ama la kulma mar qof ka daraja hooseeya oo ku' kacayo ama ku kici raba gaf, nooc kasta ah waa inuu ka hor istaago kuna qaado tilaabo sharci ah, haddii awooddiisa tahay, haddii kalese waa inuu la socodsiiyo qofka uga darajada sarreeya qaybta uu ka tirsan yahay Xadgudbahaasi.

Haddii taasu aysaan u suuroobi karin askariga ka hor istaaga samaynta waa inuu la socodsiiyaa arrintaa qofkii markaas u dhow ugana soo horreeyey shaqada.

### QODOBKA 38AAD

### LACAGTA LAGA JARAAYO MUSHAARKA

Ganaax kasta oo lagu ciqaabayo askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Daw. Hoose, galayna dambi habsami ah, waxaa laga jarayaa Mushaarkiisa uu xaqa u leeyahay bisha Lacagta laga jaraayo wxaa lagu qorayaa go'aanka lagu ciqaabaayo.

### QODOBKA 39AAD

### TALAABOOYINKA HORE EE LOOGA HORTEGAAYO GEFAF. KA

Qof kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Daw. ladda Hoose oo ogaada ku' xadgudbid habsami uu sameeyey

qofkaas, waana inuu dib u dhac la'aan horkeenaa Madaxda ka sareysa awooddana u leh inay ku qaado ciqaabta ku habboon, sarreeyuhu wu'xuu amari karaa in lagu hayo eedeysanahaas meel loogu tala galay.

## MADAXA IV

## AWOODA IYO HABKA

### QODOBKA 40AAD

Askari kasta oo ka mid ah Ciidanka Dawladda Hoose, wuxuu awood u leeyahay inuu baaro gefkii uu galo mid ka daraja hooseeya kana tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose una ah Madax rasmi ah ama meel gaar ah Koox ka mid ah Ciidanka Dawladda Hoose ee Xamar wuxuu awood u leeyahay inuu baaro gef kasta ee uu ku' kaco askari kasta oo ka tirsan Kooxda uu Madaxda u yhay.

### QODOBKA 41AAD

### HABKA DACWO QAADIDDA HABSAMIDA

Sarkaal kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho oo loo xilsaaray qaadidda dacwo habsami ah, waa inuu u sheegaa eedeysanaha dambiga loo haysto, dhagaystaana doodiisa iyo ugu dambaystii waa inuu qoraal ku soo saaro gunaanadka ugu' dambeeya (go'aan) haddii dacwo baaraha uu qabo inuu eedeysunuhu dembiga galay wuxuu ku qaadayaa ciqaab u dhigma (xeerjebinta), haddii kala waa inuu u' gudbiyaa arrinta habka kala sarreynta asagoo raacinaaya ciqaab ay la tahay inuu mntaystay.

2) Haddii eedeysunu ku caddaato go'aanka laga gaaray baarista dacwaddiisa ciqaabta lagu qaaday iyo sababihii loo cuskaday, waa in Sarkaal ama qofkii loo xilsaaray baarista dacwadda gaarsiiyaa xadgudubka ciqaabta uu muteystay dembilaha waxaa loo gudbinayaa taliyaha Ciidanka ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose isaguna markuu hubiyo kadib wuxuu awood u leeyahay inuu ogolaado amarna ku bixiyaa in la geliyo go'aankaas galka askariga la ganaaxay.

QODOBKA 42AAD

***AWOODDA TALIYAHA UU LEEYAHAY INUU WAX KA BEDELO GANAAXA***

Haddii ay la tahay Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Muqdisho in ciqaabta lagu xukumay askariga uusan u dhigmin dambiga uu ku kacay, wuxuu awood u leeyahay inuu baabi'yo, ku raaco, yareeyo ama kordhiyo ciqaabtaas. Waxaa kale oo Taliyaha uu awood u leeyahay inuu wax ka bedelo Saldhigga dambiga lagu soo eedeeyey, weydiistana baaris cusub oo la xiriirta dacwaddiisa.

*MADAXA V.*

*DEMBIGA HABSAMIDA*

**QODOBKA 43AAD**

**GEFAFKA**

Gefafka habsamida uu ku kici karo askariga ka tirsan Ciidanka Ilaalinta egaanka waa kuwa hoos ku qoran :

1) Xushmadarro nin ka daraja sarreeyo oo noqon karta, hadal, ficil dhaqan-xumo.
2) Inuu iska yeel yeelo, dib u dhigmo ama raaci waayo amar ka soo baxay madaxda ka daraja sarreysa.
3) U hoggaansami la'aan amar sharci ah.
4) Salaamid la'aan askarta ka daraja sarreysa.
5) gelid ama ku hakasho waqtiga shaqada meelaha dadweynaha ku Caweeyaan aydoo aysan jirin sabab la xiriirta shaqada.
6) Ka seexasho shaqo.
7) Sigaar cabbid, daahid iyo qaylo isagoo labisan kuna jira waqtiga shaqada, ilaalinta ama gaardiga.
8) Ka fogaasho meelaha shaqada looga diray ama bedelid shaqada amar la'aan amase sabab lama dhaafaan ah.
9) Ka maqnaasho gaardi ama shaqo loo diray ka soo daahid shaqada sabab la'aan.
10) Muujin asluub xumo iyo daryeelid la'aan iyadoo lagu jiro waqti shaqo la fulinaayo.
11) Daryeelid la'aan naftiisa, hubka iyo qalabka uu hayo.
12) Muujin la dhaqan xumo, magaala joog xumi iyo faduulnimo.

13) ka qaybgelid la'aan ama dhowrid la'aan amar la siiyey asagoo ku jira shaqo ilaalin ah (waardiyo).

14) ka qarin dadka ka darajada sarreeya, inuu qabo jirro la is qabadsiiyo ama iska yeelid jirro uusan qabin.

15) Iska daaweyn la'aan jirrooyin uu qabo.

16) isdhaaf dhaafin ama iska dhagatir, sabab la'aan inuu madaxda u gudbiyo warbixin qoraal ah oo waajib ku ah.

17) Iska dhagatir in la qoro, lana gudbiyo hawsha loo baahnaa buug gelinta ama ku qorid dokumenti loogu tala galay.

18) hor istaagid ama dib u dhigid dacwad laga soo qoray askari ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho.

19) qoritaan ama ku kaalmayn qorid warqad ama dacwo aan magac lahayn.

20) ka gelid deyn badan Ciidanka Dawladda Hoose dhexdooda ama meel kale iyadoo aysan muuqan siyaabo uu ku bixi karayo ama isku dayid la'aan inuu baxsho deyn lagu leeyahay.

21) lacag ka amaahasho askari ka daraja hooseeya.

22) khamaarid, cayaarid, ogolaasho ama ka reebid la'aan khamaar lagu ciyaarayo askarta dhexdeeda, saldhigga ama qayb ka mid ah Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose.

23) inuusan dhiibin warbixin buuxda oo run ah kuna saabsan darajadiisa iyo dhaqaalihiisa marka taa la weydiisto.

24) aqbalid iyadoo aan loo amrin inuu qabto shaqo ka duwan shaqada askarta lacag la'aanba ha noqotee.

25) guursasho iyadoon loo fasixin.

26) labisasho sharci darro ahaan dhar burgeesi isagoo laga rabo labis askari.

27) u tegid la'aan marka uu fasaxa yahay, mar allaale markay u suura gasho, madaxda ama saldhigga Ciidanka Dawladda oo ugu dhow.

28) fasax ka soo gelid isagoo dib u dhac cudur daar la'aan ah sameeyey.

29) taxadar xumi iyo dhagaysasho la'aan marka loo tababarayo ama loo akhrinyo sharciyada.

30) daan daansasho nin la darajo ah.

31) dhaqan xumo dadweynaha dhexdiisa.

32) wax ka qabasho la'aan nin ka daraja hooseeya oo jebinaayo habsamida u degsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose.

33) si hagaagsan u tababarid la'aan dadka ka hooseeya.

34) iska dhagatirid inuu fuliyo hawshiisa sidii looga rabey, khatar naftiisa inuu uga baqaayo awgeed.

35) ka dhuumasho ciqaab lagu qaadayo ama ka fogaasho amar la'aan meesha ciqaabta lagu qaadayo.

36) iska dhagatirid inuu soo dhexgalo arrin qof dadweynaha ka mid ah uu weydiistay.

37) diidid inuu gacan siiyo askari ka tirsan Ciidanka Dawladda/Hoose ee Muqdisho oo tilaab ka qaadaaya dembi uu galay askari kale oo ka tirsan isla Ciidanka.

38) ka taxadarid la'aan, ilaalin la'aan qof maxbuux ah oo lagu aaminaya inuu ilaaliyo, ayadoo ay gooni u tahay tallaabooyinka uu qorayo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed

39) iska dhaafid inuu soo sheego askarta ka daraja sarreysa qof la raadinaayo oo meel isku qarinaayo ama ku dadaalid la'aan siduu Sharciga u hor keeni lahaa

40) Ogolaasho macaamil daneysi ah, kuna imaan karo qaadid hawl iyo wax allaale wixii alaab ah oo u sahlaaya danahiisa gaarka ah.

## *MADAXA VI*

## *CIQAABAAD IYO DACWOOYIN*

### *QODOBKA 44AAD*

Ciqaabaadka uu mutaysan karo askariga waa kuwa soo socda :-

1) Darajada oo laga wada xuubsado.

2) Canaan loo geliyo galkiisa daraja kasta ha joogee.

3) Ganaax

b) In aan ka badnayn afar u dhig meel laga jaro mushaarkiisa, Saraakiisha ama kormeerayaasha.

t) in aan ka badnayn 6 (Lix) u dhig meel mushaarkiisa, L/Aliflayaasha iyo S/Alifyaasha.

j ) in aan ka badnayn 6 (Lix) u dhig meel mushaarka bisha Dableyda iyo Aliflayaasha

4) Ku xayirid xerada ama guriga muddo udhexeysa 1 hal beri ilaa 21tan beri daraja kasta ha lahaadee.

5) In lagu hayo qolka ciqaabta muddo u dhexeysa hal (1) ilaa 21tan beri dablaha ilaa saddex alifle.

6) Kororsiimada mushaarka oo muddo laga joojiyo.

7) U qorid digniin qoraal ah oo shaqo ka saarid ah hadduu la yimaado dembiyo kale.

8) Darajada oo laga yareeyo iyo gunnada xirfadda uu qaato oo laga jaro daraja kasta ha lahaadee.

9) Shaqada oo si ku meel gaar ah looga joojiyo daraja kasta ha lahaadee.

10) Shaqada Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho oo laga saaro darajo kasta ha joogee.

11) Shaqada Ciidanka Dawladda Hoose oo sharaf la'aan looga saaro.

## QODOBKA *45AAD*

### *DADKA* AWOODDA *U LEH CIQAABTA GUUD*

Waxaa wax ciqaabi kara :-

b) Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose markuu dhegeysto kadib ra'yiga Duqa Magaalada, wuxuu awood u leeyahay inuu ganaaxo ama ka fariisiyo shaqada saraakiisha ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho.

t) Saraakiisha Sare :-

1) waxay awood u leeyihiin inay ku xiraan guriga muddo 1 hal ilaa 7ba beri saraakiisha ka darajada hooseysa iyo kormeerayaasha.

2) Inay ku xiraan qolka ciqaabta muddo ah (1) hal ilaa 21tan beri, dableyda ilaa saddex aliflayaasha.

j) Saraakiisha Hoose :-

1) waxay awood u leeyihiin inay ku xiraan xerada muddo 7ba beri kuwa ka darajada hooseeya.

2) ganaax aan ka badnayn (5) shan u dhig meel mushaarka bisha ama ku xayirid xerada muddo aan ka badnan 10 (toban) beri kormeerayaasha.

3) Inay ku xayiraan qolka Ciqaabta muddo u dhexeysa 1 hal ilaa 21tan beri dableyda ilaa saddex aliflayaasha.

x) Kormeere, Taliyaha Saldhigga :-

1) waxay awood u leeyihiin inay canaan u geliyaan faylkooda kormeerayaasha ka darajada hooseeya ama saldhigga uga hooseeya.

2) Inay ku xayiraan saldhigga muddo ah (1) hal ilaa 7ba beri iyo ganaax aan ka badnayn Sh. So. 10/= (Toban) laba Aliflayaasha iyo S/Aliflayaasha.

3) Inay ku xayiraan qolka ciqaabta muddo ah (1) hal ilaa 15ba beri Dable iyo Alifla kasta ee Saldhigga.

Kh) S/Alifle iyo L/Alifle ka taliya Saldhigga ama xerada :

1) Waxay awood u leeyihiin inay ku xayiraan xerada muddo ah (1) hal ilaa 5 (shan) beri S/Aliflayaasha uga hooseeya.

2 Inay ku xayiraan qolka Ciqaabta muddo ah (1) hal ilaa 10/(toban) beri Dable iyo Alifiaha uga hooseeya xerada.

## *QODOBKA 46AAD*

## *AWOODDA KALE EE UU LEEYAHAY TALIYUHU*

Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose, wuxuu awood u leeyahay inuu ka qaado askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ciqaabaha ku xusan Qodobka kor ku qoran, haddii gefku culus yahay oo lagu qaadi karo ciqaabaha ku xusan Qodobka 46aad oo kala ah :
Ruqso, hoos u dhigid darajo iyo ka saarid Sharaf la'aan shaqo. Taliyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu hor keeno guddiga habsamida si ay u baaraan dambiga soona jeediyaan Ciqaab u dhiganta dembigaas. Ciqaabaadka ku xusan Qodobka 45aad Xarafka «B» iyo Qodobka 44aad Xubnaha 10aad iyo 11aad, haddii lagu qaadayo Saraakiisha waxaa go'aanminaya Madaxweynaha J.D.Soomaaliya isagoo dhagaystay tala jeedinta Duqa Magaalada.

*QODOBKA 47AAD*

1) Askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho oo tabanaaya Caddaalad darro uga timid Ciqaab habsa oo lagu qaaday ama qaba inay ku badan tahay Ciqaabta la saaray, wuxuu u soo qoran karaa Racfaan Madaxda sare 15ban maalmood gudahood, laga bilaabo waqtigii Ciqaabtu bilaabatay.

2) Askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, wuxuu dacwaddiisa ku soo hagaajin karaa Taliyaha isagoo dhowraaya habka jaranjarada u dhisan tahay.

3) Racfaanka lidka ku ah go'aanka Ciidanka Ilaalinta Degaanka ama guddiga habsamida waxaa loo geyn karaa Duqa Magaalada Muqdisho, isagoo awood buuxda u leh inuu go'aan kama dambays ah ka gaaro.

*QODOBKA 48AAD*

*GUDDIGA RACFAANKA*

Saraakiil kasta ama taliye saldhig oo qof hoos yimaada uu u keeno dacwad lid ku ah Ciqaab habsami oo lagu qaaday, waa inuu isagoo raacaya sida nidaamkan ku xusan uu u soo gudbiyaa Madaxda ka darajada sarreysa soona raaciyaa saxiixiisa inuu soo arkay iyo ra'yiga la xiriira racfaanka.

*MADAXA VII*

*QODOBKA 49AAD*

*ABAALMARINTA HAWSHA*

Waxaa la siin karaa askari kasta abaalgud oo qabta hawl muhimad gaar ah leh kama baxsan hawshiisa caadiga ah.

## *QODOBKA 50AAD*
## *ABAALGUDYADA LA BIXIN KARO*

Askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose, waxaa la siin karaa abaalgudyada soo socda :-

1) Saraakiil.

b) ammaan;

t) shir ka amaanid;

j) abaalsiin qiimo la'eg hawl uu u qabtay Ciidanka Dawladda Hoose;

x) dallacsiin uu mutaystay;

Kh). Sharfid (Shahaado Sharaf);

2) Kormeerayaal; S/Alifle & L/Alifle;

b) ammaan caadi ah;

t) abaalgud lacag ah;

j) Dallacsiin uu mutaystay;

x) abaalgud fasax 15ban beri ah;

Kh). Shir ka amaanid;

d) ka abaalmarin qiimo la'eg hawsha uu u qabtay Ciidanka;

r) Sharfid (Shahaado Sharaf);

3) Dable iyo Alifle;

b) ammaan caadi ah;

t) abaalgud lacag ah;

j) Shir ka amaanid;

x) abaalmarin qiimo la'eg hawsha uu qabtay;

Kh) Sharfid (Shahaado Sharaf);

d) Dallacsiin uu mutaystay.

Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose, wuxuu awood u leeyahay inuu diido abaalgudyada kor ku qoran oo aysan ku jirin dallacsiinta saraakiisha.

### *QODOBKA 51AAD*

### *AMAR JOOGTA AH*

Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka isagoo dhagaystay ra'yiga Duqa Magaalada wuxuu had iyo jeer soo saari karaa amar joogta ah si hagaagsana loogu fuliyo Sharciyada ku qoran nidaamka iyo awaamiirta la xiriirta fasaxyada, qalabka jiifka, kala soocidda iyo shaqo u qaybinta iyo wax allaale wixii sahlaya hor u socodsiinta hawlaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawl/Hoose iyo habsamidiisa.

### *QODOBKA 52AAD*

### *HAWLGAB IYO LIILTIR*

Waxyaabaha uu qorayo Sharciga lam. yahay 6 (Lix ee soo baxay 31. 12. 1969kii (Hawlgabka iyo liiltirka Ciidammada Qalabka Sida), waxaa lagu dhaqi doonaa askarta Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawldda Hoose ee Muqdisho, iyadoo toosintaan soo socota lagu sameeyey.

b) Lacagaha loo goynayo dhigaalka hawlgabka iyo liilitirka ee ay muujinayaan Xarafka (b) iyo (t) ee qodobka 22aad ee Sharcigaa isaga ah, waxaa Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose laga jari doonaa laga bilaabo 1da bisha Jennaayo 1979ka.

t) Kabka dhigaalka ee la xiriira Qodobka23aad ee Xarfaha (b) iyo (t) ee Sharciga kor ku sheegan waxaa bixin-doona Dawladda Hoose ee Muqdisho, meeshey ka bixin lahayd Dawladda Dhexe.

### *QODOBKA 53AAD*

### *DHARKA IYO ALAABADA UU XAQA U LEEYAHAY ASKARI-GU SANNAD AMA SANOOYIN*

1) Saraakiishu waxay leeyihiin Sh. So. 600/= shilin oo ay ku qaataan lebiska sannad walba

2) Ka bilaabada K/Saddexaad ilaa K Koowaad waxay lee-yihiin 2ba surwaal oo dheer iyo 2ba saryaano oo «Kaa-ki» ah qofkiiba.

Laga bilaabo S/Alifle ilaa askari waxay leeyihiin 2ba Sur-waal oo dheer dheer iyo 2ba Shaati oo gacma gaab «Kaaki ah».

3) Layli waxay leeyihiin 2ba surwaal oo gaagaabana 2ba shaati gacma gaab iyo 1 hal surwaal oo dheer Kaaki ah.

4) Alaabada ka dhexeysa askarta oo dhan oo aan saraa-kiishu ku jirin :

b) Koofiyo baana kaaki ah (1) hal xabo 2 Labadii sana-ba.

t) Suunka dhexda (1) hal qiyaas Shantii sanaba (5).

j) kabaha (1) hal baayo iyo cusboonayn sannadkiiba;

x) kaalso (2) Laba baayo sannadkiiba;

Kh) Calaamadaha garbaha (2) laba baayo sannadkiiba;

d) seeri ama frimbi (1) hal xabo 5tii (shantii) sanaba; iyo xarig.

r) galuus (8) siddeed xabo askari ilaa Kormeere 5tii sa-naba;

s) Calaamadaha qoorta (alamani) 2 xabo 5tii sano.

sh) funaanadaha dhaxanta iyo kubeerto hal hal 4tii sana-ba;

dh) kabood hal xabo 10kii sanaba

c) koorka roobka (1) hal xabo 5tii sanaba.

### *LIFAAQA* «A»

### *LOOXA* JARANJADA KALA *SARRAYNTA DARAJOOYINKA* *KA CIIDANKA* ILAALINTA *DEGAANKA DAWLADA HOOSE* *EE* MUQDISHO

| **Darajada** : *1aad MUSHAARK/* Raashin | Saldhigga ah | Ijaar Guri | |
|---|---|---|---|
| G/Sare | 1660/ | 300/ | 60/ |
| G/Dhexe | 1430/ | 200/ | 60/ |
| Gaashaanle | 1320/ | 150/ | 60/ |
| Dhamme 2aad | 1110/ | 100/ | 60/ |
| L/Xiddigle 3aad | 1020/ | 100/ | 60/ |
| Xiddigle 4aad | 910/ | 100/ | 60/ |
| K/3aad 5aad | 720/ | 60/ | 60/ |
| K/2aad 6aad | 630/ | 60/ | 60/ |
| K/1aad 7aad | 540/ | 60/ | 60/ |
| Saddex A/le 8aad | 510/ | 50/ | 60/ |
| L/Alifle 9aad | 480/ | 50/ | 60/ |
| Alifle 10aad | 420/ | 40/ | 60/ |
| Dable 11aad | 390/ | 40/ | 60/ |
| D/Dhiman 12aad | 150/ | | 150/ |

## *QODOBKA* 54AAD

## *QAABKA MUSHAARAADKA* IYO *GUNNOOYINKA*

Lifaaqa sharcigaani wuxuu tusayaa qaabka mushaaraadka iyo gunnooyinka kala duwan ee loo dejiyey ku dhaqanka Ciidanka Ilaalinta Degaanka Dawladda Hoose ee Muqdisho, sida ka muuqata Looxa «A» iyo «B» ee halkaan ku lifaaqan.

## *QODOBKA* 55AAD

## *GUNNADA* L/*SARAAKIISHA*

1) L/Sarkaalka Waddanka gudihiisa wax ku barta wuxuu xaq u leeyahay

b) Gunnada cuntada ———— Sh. So. 200/= (Lababoqol) Shilin;

t) Gunnada jeebka ———— Sh. So. 100/= (boqol) Shilin;

2) L/Sarkaalka dibadda wax ku barta waxay xaq u leeyihiin gunnada jeebka oo ku jaan go'aan So. 100/=.

F. G. Haddii L/Sarkaalku uu horay uga mid ahaan jirey Ciidanka Ilaalinta Degaanka muddo ka badan laba sannadood wuxuu xq u yeelanayaa xuquuqda darajada uu sito iyo midda L/sarkaalnimada.

Haddii L/Sarkaalku mudada uu ka mid ahaa Ciidanka Degaanka la'eg tahay ama ay ka yar tahay laba sanadood wuxuu xaq u yeelanayaa xuquuqda L/sarkaal oo kali ah

## LIFAAQA «B»

### 1) GUNNADA XILKA

Saraakiisha soo socota waxay xaq u leeyahay gunnooyinka mid waliba ku hor qoraan :-

| | |
|---|---|
| b) Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka | Sh. So. 500/= |
| t) Taliye Xigeenka 1aad | Sh. So. 300 |
| j ) Taliye Xigeenka 2aad | Sh. So. 200/= |
| x) Taliye Saldhig | Sh. So. 150/= |

Wixii kale oo xil ah oo soo baxa waxaa loo samayn doonaa go'aan.

### 2) GUNNADA FARSAMAYAQAANADA, XIRFADLE & WIXII LA MID AH

1) Shufeer;
2) Makaanik;
3) Kaaliye Makaanik;
4) Xisaabiyaha Ganaaxa iyo Bolleetooyinka;
5) Qoraha Xafiiska;
6) Kaaliye Takhtar (infermiere);
7) Makiinad garaace;
8) Nadiifiyaha Xafiisyada iyo musqulaha;

Wixii kale oo farsamayaqaan ama Xirfadle ah ee soo baxa waxaa lagu dari doonaa Qodobkaan. Gunnooyinka Farsamayaqaanada, Xirfadle IWM waxay ka bilaabmi doonaan Sh So. 70/ ilaa Sh. So. 100/= Shilin bishiiba.

### 3) GUNNADA SAFARKA GUDAHA

| | |
|---|---|
| 1) Taliyaha Ciidanka I. Degaanka Daw/Hoose | Sh. So. 20/= |
| 2) Taliye Xigeenada | Sh. So. 20/= |
| 3) Dhamme, L/Xiddigle iyo Xiddigle | Sh. So. 20/= |
| 4) K/S. K/L. iyo K/Koowaad | Sh. So. 20/= |
| 5) S/A iyo L/Alifle | Sh. So. 20/= |
| 6) Alifle iyo Dable | Sh. So. 20/= |

### 4) CUNNADA SAFARKA DIBEDDA

| | |
|---|---|
| b) Taliyaha Ciidanka I. Degaanka D/Hoose | Sh. So. 240/= |
| t ) Ciidaanka intiisa kale dhammaan | Sh. So. 240/= |

## QAYBTA SEDDEXAAD

SOCIET COMMERCIALE ITALO SOMALA — S.C.I.S S.P.A
Saldhigga : Muqdisho (J. D. Soomaaliya)
Raasumaal Sh. So. 5.000.0000 00

L. 132

### OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda Societ' Commerciale Italo Somala — S. C. I. S. — S. P. A., waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Lugano, Svizzera, waddada Bivezia, Lamb. 10, maalinta 19ka Juunyo 1980 saacaddu markey tahay 14, fadhiga ugu horeeya, haddii taas suura geli waayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 2aaka Juunyo 1980 isla saacadda kor ku qoran, si go'aan loogu gaaro arrima-

### BARNAAMIJKA DOODA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;

2) Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31.12.1979

3) Dhisidda lambarka Guddiga Maamulka guud, magacaabid Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb galaan sahmi qabayaasha ku qoran buugga xubnaha Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono oona ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda saldhigga Sharikadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Sharikadda Societa' Agricola Italo Somala ay ku leedahay Milano, Via Cappuccini, lamb. 14, amase :

— Credito Italiano, Sede di Milano;

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Limanik, Corso Blvezia, Lamb. 10 Lugano.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 132

SOCIET' COMMERCIALE ITALO SOMALA — S.C.I.S. — S.P.A.
Sede legale: Mogadiscio (Repubblica Democr. Somala)
Capitale sociale inter. versato Shs. So. 5.000.000

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLBA ORDINARIA

Gli Azionisti della Societa' Commerciale Italo Somala — S.C.I.S. — S.P.A. con sede in Mogadiscio sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Corso Blvezia n⁰ 10, il giorno 19 Giugno 1980, alle ore 14, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocatione il girno 25 Giugno 1980, nello stesso luogo ed alla stessa ora, per discutere e deliberare sul seguente.

**ORDINE DBL GIORNO**

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Repporto del Collegio Sindacale;

2) Bilancio e Conto Profitti and Perdite dell' esercizio chiuso al 31 dicembre 1979 e deliberazioni relative.

3) Nomina dei componenti il Consiglio di Amministrazione, previa determinazione del numero degli stessi, e del Collegio Sindacale.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea come sopra convocata gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede sociale in Mogadiscio, o presso gli Uffici di Recapito della Societa' Agricola Italo Somala in Italia, Via Cappuccini n⁰ 14, Milano, oppure presso le seguenti casse:

— Credito Italiano, Sede di Milano;

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corso Elvezia n⁰ 10, Lugano.

*IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE*

L. 133

SOCIBTA' ROMANA IN SOMALIA — S. P. A.

Saldhigga : Kismaayo (Jamhuuriyadda D. Soomaaliya)

Rasumaal Shs. So. 2.000.000

## OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda Societa' Romana in Somalia — S. P. A. — waxaa la isugu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qabaan doono Lugano (Svizzera), waddada Elvezia, Lamb. 10, maalinta 19ka Juunyo 1980 saacadda 11ka subaxnimo fadhiga ugu horeeya, haddii taas suura galiwaaydo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 25ka Juunyo 1980 isla saacadda iyo isla meesha sida kor ku qoraan, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo soeda :

## BARNAAMIJKA DOODA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;

2) Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31.12.1979 iyo go'aanada la xariira.

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buuga xubnaha Sharikadda isla shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oo ma ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga Sharikadda oo Kismaayo, amase Xafiiska Societa' Agricola Italo Somala, ku yaal Itaaliya, Via Cappuccini, Lamb. 14 Milano, amase :

— Banco Di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano.

— Lemanik, Corso Elvezia, Lamb. 10, Lugano

## GUDDIGA MAAMULKA

L. 133

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA — S. P. A. —

Sede sociale Kismaio — Republica Democr. Somala

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Societa' Romana in Somalia — S. P. A. caan sede in Kisimaio sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Corso Elvezia n° 10, il giorno 19 Giugno 1980, alle ore 11, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 25 Giugno 1980, nello stesso luogo ed alla stessa ora, per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapport del Collegio Sindacale;

2) Bilancio e Conto Profitti & Perdited dell'esercizio chiuso al 31 Disembre 1979 e deliberazioni relative.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea come sopra convocata gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro taletermine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede sociale in Kismaia o presso gli Uffici di Recapito della Societa' Agricola Italo Somala in Italia, Via Cappuccini n° 14, Milano, oppure presso le seguenti casse:

— Credito Italiano, Sede di Milano;

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corse Elvezia n° 10, Lugano,

IL CONSIGLIO DI AMMINSTRAZIONE

L. 133

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA — S.A.I.S. — S.P.A.

Saldhigga : Muqdisho (J. D. Soomaaliya-

Raasumaal Shs. So. 1.200.000,00

OGEEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda Societa' Agricola Italo Somala — S. A. I. S. — S. P. A. waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Lugano (Svizzera, waddada Elvetia, lamb. 10, maalinta 19ka Juunyo 1980 saacaddu 9ka subaxnimo fadhiga ugu horeeya, haddii taas suura geliwaaydo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 25ka Juunyo 1980 isla saacadda iyo isla meesha kor ku qoraan, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda :

**BARNAAMIJKA DOODA**

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;

2) Miisaaniyadda iyo Kharajka iyo Dakhliga ilaa 31da Diseember 1979 iyo go'aanada la xariira.

waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buugga xubnaha Sharikadda shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga Sharikadda oo Muqdidisho, amase Xafiiska Sharikadda ku yaal Itaaliya, Waddada Cappuccini, Lamb. 14, Milano, amase :

— Credito Italiano, Sede di Milano, Italia;

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corso Elvetia, Lamb. 10, Lugano.

**GUDDIGA MAAMULKA**

L. 134

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA — S.A.I.S. — S.P.A.

Sede sociale : Mogadiscio — Repubblica Democ Somala Capitatale sociale inter. versato Shs. So. 1.2000.000

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLET ORDINARIA

Gli Azionisti della Societa' Agricela Italo Somala — S.A.I.S. S. p. A. — con sede in Mogadiscio sono convocati ia Assemblea Ordinaria in Lugano, Coroe Elvezia n° 10, il giorno 19 Giugno 1980, alle ore 9 in prima convocazione ed, occorrendo, in soconda convacazione il giorno 25 Giugno, nello stesso luogo ed alla otessa ora, per discutere e deliberare sul seguento :

**ORDINE DEL CIORNO**

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Repporto del Collegio Sindacalo;

2) Presentazione Bilancio o Cto Profitti e Perdito dell' esereizio chiuso al 31 dicembre 1979 e deliberazioni relative.

Avranno diritto di partecippare all' Assemblea come copra convecata gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinquo giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro talo termineabbiano effettuato il deposito delle azioni preaso la Sede sociale in Mogadiscio e presso gli Uffici di Recapito della Societa' in Italia, Via Cappuccini n° 14, oppure presso le seguenti casse :

— Gredito Italiano, Sede di Milano;

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corso Elvezia n° 10, Lugano,

*IL CONSIGLIO DI AMMINSTRAZIONE*

L. 134

**MAXKAMADDA G. BANAADIR**

HADDUU AKHRIYEY dacwadda kor ku qoran;

HADUU HUBSADAY : in Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 2822 lagana soo soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 6.279 uu Iskalahaa Faadumo Kulmiye Weheliye sida ku cad warqadda lambar 1020 Taariikh ——— oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

HADDUU ARKAY : Qod 69 sharciga lamb 2 ee 9. 9. 1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga Keydka lamb. 2822. oo ku qoran Magaca Faadumo Kulmiye Weheliye ayna ku jirto Sh. So. 6.279/

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beddelo Faadumo Kulmiye Weheliye (buugga keydka) ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin Muqdisho, 30. 3. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAADDA GOBOL. BENAADIR

*Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY : dacwadda kor ku qoraan

HADUU HUBSADAY : Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu

In la baabi'iyo Buuga Kaydka L. 14418 oo ku qoran Magaahaa 14418 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keyd-

### WUXUU XEERIYEY

ka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So 613/ uu iska lahaa Cabdulqaadir Xaaji Yaasiin sida kucad

warqadda lamb 01095 Taariikh Cabdulqaadir Xaaji Yaasiin oo

ca Cabdulqaadir Xaaji Yaasiin ayna ku jirto Sh. So. 613

bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADUU ARKAY : qod. 69 sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965

### WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beddelo Cabdulqaadir Xaaji Yaasiin (Buug Keydka) ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR

*Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax*

L. 134/Bis

## SOMALI BOTTLING COMPANY HARGEYSA

## OGEYSIIN KA SOO QEYB GAL SHIRWEYNE

Dhammaan waxaa loo yeerayaa Saamileyda Shirkadda Soomaali Botting Compeny iney isku yimaadaan Shirweyne Caadi ah iyo mid aan caadi ahayn 3. 9. 1980 saacaddu marka ay tahay 16 P. M. Xarunta Hargeysa marka hore, haddii loo baahdana mar labaad 11. 9. 1980 isla xarunta iyo saacadda kor ku qoran, taasoo waafaqsan qodobada 2366 — 2369 iyo wixii la mid ah oo la xiriira qodobbadaas.

Sida qodobbada Xeerka Madaniga ah, waxaa laga hadli doona arrimah hoos kc qoran:

### DHINACA CAADIGA AH

1) Oggolaashaha Miisaaniyeddii 1979,

2) In loo doorto guddiga Maamulka,

3 In la doorto Guddiga Hantidhowrka.

### DHINACA AAN CAADIGA AHAYN

1) In dib loo habeeyo Istatuutada Shirkadda

2) In laga wada hadlo wixii arrimo ah ee loo baahdo, lana xiriira arrimaha kor ku qoran.

### GUDDIGA MAAMULKA

134/BIS